

... horey u gudub!

Haddii aad dareentid inaad shaqadaada meelna uga gudbi karin way adkaan kartaa in la ogaado jihada la qaadanayo. Waxaan kaa caawin karnaa inaad go'aansatid waxa aad dooneysid inaad sameysid.

- Xaggeen ka heli karaa maaddooyinka deegaanka?
- Waxaan doonayaa inaan dib u tababarto – sideen u sameeyaa intaan shaqada ku jiro?
- Miyaan awoodi doonaa inaan maalgelin u helo tababarkayga?
- Xaggeen caawino daryeel ilmood ka heli karaa?

Waxaan kaa caawin karnaa inaad jawaab u heshid su'aalahaan oo dha iyo in ka badan, aadna tallaabada xigta si kalsooni leh u qaaddid.

Qaad tallaabada xigta

Xadhigga ka jar taagtaada maantaba – waqti ka wanaagsan weligii ma uusan jirin.

Nagala soo xiriir war bilaash ah oo cagta kuu saari doona waddada lagu gaarayo shaqo aad loogu qanco ama kalsooni la kordhiyey ee wax kasta oo aad sameyneysid.

Waxaad nagula soo xiriiri kartaa telefoon, e-mail, ama warqad ayaad noogu soo qori kartaa cinwaanka hoose si aad wax badan u ogaatid.

wax badan kasbo

wax badan ka hel nolosha

Ma waxaad dareensan tahay inaad xannibantay? Waxaan kaa caawin karnaa...

xirfad beddelasho samee

Xirfado cusub horumari

wax cusub baro

IAG contact details

Funded by:



Leading learning and skills

FOI_[Insert local reference number]
Somali



Sideen kuu caawin karnaa

Miyaad shaqadaada ku xannibantay aadna dooneysaa inaad isbeddel sameysid? Ma dooneysaa inaad wax badan nolosha ka sameysatid? Ma u baahan tahay shaqo? Adeegga tallaabada xigta ee deegaankaagu wuxuu ku siin karaa war bilaash ah oo ku aaddan maaddooyinka waxbarashada, tababarka iyo shaqooyinka.

La qabso...

Waxaan kaa caawin karnaa inaad kor hagaajiso ifafaalahaaga shaqeed, aad heshid shahaaddo, ama aad inta ugu wanaagsan ka sameysatid shaqadaada.



In badan hel...


Adeeggaaga tallaabada xigta wuxuu leeyahay war fara badan oo wax ku ool ah iyo talo ku saabsan shaqooyin cusub, daryeel carruur, deeqaha loogu talagalay waxbarasho iyo tababar, iyo meesha loo doonanayo caawino haddii aad naafonnimo qabtid.

'Iskuul waxaan ka tagay markaan jiray 15 anigoo lahayn wax talo xirfadeed ah. Kuma aanan riyoonin waxa farqiga ah ee ay aniga hadda ii sameyn karaysay.'

Talo kugu habboon raadso ...

Haddii aadan lahayn shahaaddooyin (tusaale. Wixii ka yar shan GCSEs ama Shahaaddada NVQ heer 2), adeegga tallaabada xigta wuxuu ku deeqi doonaa kulan talo bilaash ah.

Waad iska imaan kartaa waxaadna isku duwi kartaa waqti aad la hadashid mid ka mid ah la taliyeyaasheenna madaxa bannaan ee saaxiibtinnimada leh. Waxay ku siin doonaan war iyo talo ku saabsan fursadaha waxbarashada deegaankaaga iyo caawinada maaliyadeed ee aad heli karaysid. La taliyahaagu wuxuu kaala hadli doonaa xirfadahaaga iyo danahaaga wuxuuna kaa caawin karaa inaad go'aansatid waxa aad dooneysid inaad sameysid marka xigta.



Jiho cusub qaadasho


Bill uma uusan maleyneynin in xiiseynta taariikhda deegaanka isla markaana fasax u qaadashada caravan-ku inuu ku caawin karo helitaanka shaqo cusub. Laakiin iyadoo ay la jirto caawinada la taliyaha adeegga tallaabada xigta ayuu wuxuu awooday inuu ballaariyo raadintiisa shaqo iyadoo loo marayo codsiyo la saadaalin karo oo ku wajahan beeraha nasashada caravan-ka ee qiimaynaya aqoontiisa.

'Dadku waxay u baahan yihiin hadaf noloshooda ah – ujeedo loogu talagalay waxa aad dooneysid ka dibna raadso!'

Horey u dhaqaaqid

Neil wuxuu weligii helay hal shaqo oo lacag lagu siiyo ilaa iyo markii uu ka tagay iskuulka taasina waqti dheer ma aysan socon. La taliyaha tallaabada xigta ee Neil wuxuu ku dhiirrigeliyey inuu codsado shaqooyin joogto ah isla markaana uu kor ugu qaado xirfadihiisa aasaasiga ah ee akhrinta iyo xisaabta.

'Hagaajinta xirfadahayga aasaasiga ah waxay awood ii siisay inaan u gudbo shaqo. Kalsoonideydii ayaa soo hagaagtay iyo sidoo kalena xirfadahayga xiriirta ...waan ku faanayaa meesha aan maanta joogo – mooto cusub, lacag bangi ii taalla iyo madax bannaani.'



Shaqo ku noqosho

Darshana waxay Ingiriiska timid 1988 waxayna ka timid Hindiya waxayna dooneysay iney shaqo waqtiga badhkii ah dib ugu noqoto ka dib markii ay qoys yeelatay. La taliyeheda tallaabada xigta wuxuu ka caawiyey hawsha oo dhan ee shaqo helidda.

'Kulannada aan la qaatay la taliyehaygu waxay ahaayeen kuwo qurux badan aadna ii caawiya. Shakhsi ahaan, waxaan dareensanahay inaan isku kalsoonahay aanna diyaar u ahay inaan wajaho hardan cusub.'